



Washington State
Hate Crimes &
Bias Incidents
Hotline (Khadka
Taleefanka ee
Gobolka Washington
ee Dembiyada
Naceybka iyo
Dhacdooyinka Eexda)

Soo sheeg Naceybka. Hel Taageero.

Haddii aad la kulantay ama aad aragtay xaalad nacayb, waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno.

Waxaan taageernaa dadka la bartilmaameedsaday ama loo bartilmaameedsaday sabab la xiriirta sida loo arko ama aqoonsigooda dhabta ah, sida:

- Isirka ama midabka
- Wadanka qofku u dhashay ama asalka qoyseed
- Diinta
- Xaaladda naafanimo
- Dookha galmada
- Aqoonsiga ama muujinta jinsiga
- Xaaladda socdaalka
- Xaaladda milatari ama howlgab ciidanimo
- Isticmaalka xayawaan adeeg oo tababaran

La xiriir Khadka taleefanka



855-225-1010



atg.wa.gov/report-hate



Waxaa lagu heli karaa luuqado badan

Bilaash ah. Asturnaan leh. Gobolka oo dhan laga heli karo.

Khadka taleefanka waa mid asturnaan leh, bilaash ah, wuxuuna ka shaqeeyaa gobolka oo dhan iyadoon loo eegin xaaladaada sharciga. Annagu ma nihin boolis, mana u gudbino booliska wax macluumaad ah adigoon oggolaansho na siin.

Waxaa bixiya Washington State Office of the Attorney General (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Gobolka Washington).



Soo sheeg Naceybka.
Hel Taageero.

Keligaa ma tihid.

Waxyaabaha aan ka caawino

- Dembiyada naceybka (weerarka, hanjabaada, ama burburinta hantida oo ay sababtay eexda)
- Dhacdooyinka eexda ku saleysan (hadal ama dhaqan cadaawad ah ama takoor muujinaya)
- Ku xidhidda taageero deegaanka ah oo fahmaya dhaqamada kala duwan oo lagu heli karo luqado badan.

Markaad nala soo xiriirto

- Waxaad la hadli doontaa xubin ka tirsan koox tababaran— waxaana jira turjumaad lagu heli karo in ka badan 240 luqadood.
- Waxaad helaysaa macluumaad iyo gudbin adeegyo.
- Adiga ayaa dooranaya waxa xiga ee aad samaynayso.

Waxyaabaha aanan samayn

- Ka jawaabidda xaaladaha degdegga ah (wac 911 haddii aad khatar ku jirto)
- Baaritaanno dembiyeed
- Lama xiriirno booliska haddii aadan rabin.

La xiriiridda khadka taleefanka kuma gelinayso khatar dhinaca xaaladda socdaalka.

La xiriir Khadka taleefanka



855-225-1010



atg.wa.gov/report-hate



Waxaa lagu heli karaa luqado badan

Bilaash ah. Asturnaan leh. Gobolka oo dhan laga heli karo.

Khadka taleefanka waa mid asturnaan leh, bilaash ah, wuxuuna ka shaqeeyaa gobolka oo dhan iyadoon loo eegin xaaladaada sharciga. Annagu ma nihin boolis, mana u gudbino booliska wax macluumaad ah adigoon oggolaansho na siin.

Waxaa bixiya Washington State Office of the Attorney General.